GOVERNMENT OF WESTERN AUSTRALIA

ROAD SAFETY COMMISSION

SOMALI

# HAGAHA DARAWALNIMO EE WADDOOYINKA WA



Waxaa soo saaray oo daabacay
Guddiga Nabadeynta Waddooyinka
Oktoobar 2021

**Haddii aad jeclaan lahayd dukumintigan oo qaab kale ah fadlan nala soo xiriir.**

Cinwaanka xafiiska:

Road Safety Commission
Level 1, 151 Royal Street
EAST PERTH WA 6004

Cinwaanka boostada:

Road Safety Commission
PO Box 6348
EAST PERTH WA 6892

Telefoon: 1300 999 772
Fax: (08) 6552 0802
Email: info@rsc.wa.gov.au
Internet: www.rsc.wa.gov.au

Hagaha gaari ku wadida Wadooyinka WA wuxuu bixiyaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sharciyada waddooyinka, calaamadaha iyo tilmaamaha wadista baabuurta ee tuulooyinka iyo meelaha fogfog.

Wadista gawaarida Western Australia aad ayey uga duwan tahay meelaha kale ee adduunka. Hagahan waxaad ka heleysaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan la wadaagida waddooyinka wadayaasha bushkuleetiga iyo baabuurta culus, isticmaalidda taleefanka gacanta oo mashquuliya qofka, ilaalinta dadka lugeynaya, dhaafitaanka waddada tareenada, kuwadista waddooyinka jayga ah iyo calaamadaha waddooyinka qaarkood.

Sidaas awgeed waxaan kugu dhiirrigelinaynaa inaad akhriso hagaha oo aad wadista baabuurka ka dhigto mid ammaan ah oo raaxo badan. Tan kale, Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa “War La helaa Talo La Hel” (“Right decision is realised through right information”).

**Qunsuliyadda Soomaaliya**

**3 Qormooyinka Qunsuliyadda**

**5 Hordhac**

**6 Waxyaabaha ay tahay in la ogaado**

- **9** Dhanka bidix ku ekoow
- **10** Ka gudbida leymanka wadada
- **12** Hubinta gawaarida
- **14** Ilaali dadka lugaynaya
- **15** La wadaagida wadada bushkuleetileyda
- **16** La wadaagida wadada gawaarida waaweyn
- **17** Wadista mooto
- **18** Sida loogu darsamo leyn kale
- **19** La wareegida iyo dib-u-noqoshada
- **20** Xawaaraha
- **21** Gawaarida gurmadka
- **22** Wadista qofka oo cabsan ama daroogo isticmaalay
- **23** mashquulinta taleefanka gacanta
- **24** Suumanka waxay badbaadiyaan nolosha

**26 Ku wadista baabuurta gobolada iyo meelaha fog fog**

- **27** u istaagida sawirrada
- **28** Daal fara badan safar dheer dabadeed
- **30** Ku wadista waddooyinka jaayga ah
- **32** dhaafitaanka waddada tareenada
- **34** Xayawaanka duurjoogta ah ee wadada soo gala
- **36** Muuqaalka hooseeya
- **37** Nalalka iftiinka badan

**38 Calaamadaha waddada**

- **40** Calaamadaha waddooyinka qaarkood ee Western Australia
- **41** Tilmaamaha calaamadaha baarkinada
- **42** Aagagga dhowrka nuuc loo isticmaalo
- **43** Macluumaad iyo ilo waxtar leh

## Western Australia waa ay ka weyn tahay Yurubta Galbeed oo dhan.

Muuqaalka, duurjoogta, dhirta, cimilada, hawada iyo dhaqanka Aborijiniska ayaa si weyn ugu kala duwan Gobolka oo dhan. Siiba tuulooyinka iyo meelaha fog fog ee WA waxaa laga helaa khibrado gaar ah oo lagu raaxeysto.

Masaafada u dhaxeysa goobaha badanaa wey ka fog yihiin intaad filayso. Qormadan waxay tilmaamaysaa xeerarka waaweyn ee waddooyinka waxayna u tahay tilmaan hage xaaladaha qaarkood ee aad la kulmi karto. Waxaan rabnaa inaad ku raaxeysatid sahaminta WA oo aad noqotid mid nabad gala. Fadlan si taxaddar leh u wad baabuurka. Ku raaxayso safaradaada WA!

Guddiga Nabadeynta Wadooyinka ayaa u heellan yareynta jahwareerka waddooyinka - oo ka mid ah sababaha ugu waaweyn uguna keenista badan dhimashada iyo dhaawaca bulshada dhexdeeda. Waxaan ku dhiiri galinaynaa dadka isticmaala wadada inay si nabad galyo ah u kaxeeyaan gawaarida ayna ka fogaadaan shilalka.

Macluumaad gaar ah oo ku saabsan sharciyada waddooyinka iyo xadgudubyada waxaa laga heli karaa https://www.rsc.wa.gov.au/Rules-Penalties.

Sawiro si aad u booqato bogga Badbaadada Wadooyinka si aad wax badan uga ogaatid Xeerarka iyo ganaaxyada Western Australia.



# WAXYAABAHA LOO BAAHAN YAHAY IN LA OGAADO

## WAXYAABAHA LOO BAAHAN YAHAY IN LA OGAADO

- Had iyo jeer ku wad baabuurka bidixda.
- Qorshee safarkaaga.
- Xusuusnow khatarta qiiqa ka dhasha dababka duurka iyo boodhka ay sababaan gawaarida kale iyo dabeylaha badan. Ka fogow wadista baabuurka marka qiiq ka jiro aagga.
- Ka fogow waddooyinka biyuhu ku fataheen. Ha ku dhex wadin baabuur biyaha daadadka. Waxay noqon karaan kuwo ka qoto dheer biyuhuna si dhaqsi ah ugu socdaan sida ay kuula muuqdaan.

  Wixii digniino ah, ka hubi:

  **Gurmadka degdega ah WA**
  emergency.wa.gov.au

  **'Khariidada safarka' ee Main Roads**
  mainroads.wa.gov.au

- Ka digtoonow lo'da, kangaroos, goranyada iyo duurjoogta kale iyo xoolaha waddooyinka, siiba markay qorrax dhaca tahay.
- Bidix ha u leexan marka nalka guduud yahay.
- Roobab daadad ah ayaa yareeya aragtida waxayna kordhiyaan halista.
  - U wad adoo qadarinaya marxalada markaas taagan.
  - Daar nalka hore ee gaarigaaga.
  - Isticmaal masaxaada muraayadaha.
  - Weligaa ha isku dayin inaad ka gudubto waddooyinka daadadku ku fataheen.

### Xeerarka leysanka darawalnimada

Marka aad gaariga wadid, waa inaad qaadataa leysankaaga darawalnimada ee dibedda iyo tarjumaadiisa haddii kaaga orijinaalka ah uusan eheen mid ku qoran ingiriis, ama uusan eheen Oggolaanshaha Darawalnimada Caalamiga ah (an International Driver's Permit IDP).

Haddii aad damacsan tahay inaad baabuur ama mooto ku wadato Australia oo leysankaaga dibedda uusan ku dhaganeen sawir, waa inaad heshaa Internation Driver's Permit (IDP) intaadan kasoo dhoofin wadankaagii hooyo.




# WADISTA
# NABDOON

# DHANKA BIDIX KU EKOOW

Australia gudaheeda, dhammaan gawaarida waxay ku socdaan dhinaca bidix ee wadada.

Haddii aadan u baran inaad ka kaxeyso dhanka bidix, meesha hore ee baabuurka qoraal ku xasuusiya inaad dhinaca biddix ku wado ku dhajiso. Shirkadaha baabuurta kireeya qaar ayaa gaariga gudihiisa ku dhejiya istiikarada ku xasuusinaya inaad dhanka biddix kuwado.

Markaad mareyso isgoys ama aad leexaneysid, taxaddar dheeraad ah samee.

Waddooyinka dhowrka leen leh, oo xawaareheedu yahay 90km / saacaddii ama ka badan, waa inaad ku wadaa dhanka bidix, inaad:

- baabuur dhaafaysa maahane
- ama leenka bidix uu yahay mid loogu talagalay baska ama baaskiilka maahane
- ama aad iska ilaalinaysid carqalad maahee.



# KA GUDBIDA LEYMANKA WADADA

Calaamadaha xariiqda wadada waa hagayaale ku saabsan sida loo isticmaalo wadada, waxaana ku jira leynka geeska, leynka kala bara labada wado ee isku dhinac ah iyo khadadka dhexe.

Waxaa jira saddex nooc oo khadad isdaba joog ah, oo aan kala go'ayn:

**1. Leynka geeska waxay calaamadeeyaan cidhifka wadada**

- Waxaad ka gudbi kartaa xariiqda geeska keliya marka aad geleyso ama aad ka baxeysid wadada, aad ka dhaafeysid bidix baabuurka midig u leexanaya, ama marka aad kala wareeg sameyneyso.

**2. Leynka kala bara baabuurta isku dhinac u socoto wuxuu qeexaa marino badan oo isku jiho u socdaalaya**

- Haddii leynka kala bara baabuurta isku jihaka u socota uusan kala go'neen, haka gudbin leenka si aad leenka u badalatid.

**3. Dhexda / leenka kala qeybiyo waxay kala baraan wadooyin u kala socda dhinacyo kala duwan**

- Haddii dhexda / leenka kala qeybiyo ay yihiin kuwo aan kala go'neen, haka gudbin xariijintaas inaa u leexaneyso midig maahee ama inaad ka baxeysid ama aad waddada aad soo galeysid ama aad kala wareeg sameyneysid maahane. Isla sidaas ayaad ula dhaqmeysaa haddii ay jirto xariijin biddix ama midig oo oo aan kala go' leheen marka leenka dhexe ee wadada uu kala jar jaran yahay.
- Haddii ay jirto xariiq dhexe oo kala go'go'an oo dhanka biddix ka ah xariiq kale oo aan kalago'neen isla markaasna dhexda marta, leynka waad ka bixi karta si aad u dhaaftid baabuur, haddii ay ammaan tahay in sidaas la sameeyo. Haka gudbin haddii Xariijinta aan kala go'neyn eey kasoo xigto dhinaca bidix tan kala go'go'an.
- ***Marka laga reebo***: Waad ka gudbi kartaa xariijin aan kala go'neyn markaad dhaafeysid baaskiil qof wata - laakiin waa keliya marka ay ammaan tahay. Sidoo kale waa waajibbinaad xaqiijisaa inay masaafo u dhexeyso gaarigaaga iyo qofka baaskiilka wato. Sidoo kale eeg bogga 15 (La wadaagida wadada baskiileyda).



## XARIIJINTA KALIGEED AH EE AAN KALA GO’A LAHEEN (marna haka gudbin si aad baabuur u dhaaftid)



## XARIIJINTA KALA GO’GO’AN



## XARIIJINTA KALIGEED AH EE AAN KALA GO’A LAHEEN (marna haka gudbin si aad baabuur u dhaaftid)



## HAL LEEN OO KALIGIIS AH OO AAN KALA GO’NEYN (waxaad dhaafi kartaa baabuur marka xariijinta kala go’go’an eey dhinaca bidix kasoo xigto mida aan kala go’neen, oo eeyna ammaan tahay inaad saas sameysid)







# HUBINTA GAWAARIDA

Haddii aad qof kasoo qaadatid baabuur ama kireysatid, raadi talo ku saabsan tusaalaha ugu fiican ee safarka, adoo tixgelinaya xaaladaha waddooyinka.

Waddooyinka jaayga ah ee laamiga dhamaadkiisa ah iyo kuwa jaay ga ah kuma habboona baabuurta caadiga ah.

Raac talada shirkada baabuurka kaa kireysay ee ku saabsan amaanka iyo gaariga ku haboon ee aad isticmaaleyso.


Haddii aad gaari ka qaadaneysid qoyska ama saaxiib, hubi in caymiska mulkiiluhu ay kujiraan darawalo kale oo sameey hubinta dhinaca ammaanka ee safarka kahor.



- Hubi nalalka hore, nalalka fariinka, fareejooyinka, in laydhka dib-u-noqoshada shaqeynayo oo sii qaado nalal aad ku badali karto haduu mid gubto.







- Hubi xaaladda taayirrada iyo taayirka keydka ah.
  - Ka fiiri dildilaac, barar ama cilado kale taayirrada.
  - Raadi shay kasta oo taayirrada ku dheggan kana saar.
  - Godadka taayarada waa ineey qodnaadaan in kabadan 3mm ama in la eg afka hore taraqa. Haddii kale, beddel taayirka.
  - Hubso in taayirada ku xiran baabuurka iyo kan keydka kuu ah eey leeyihiin aaryo ku filan. Inta saxda ah ee aaryada taayirka gaarigaaga waxee kutaala calaamad ku dhagan dhanka albaabka darawalka. Ha ka badin aaryada.
  - Gawaarida qaar waxay keyd ahaan u leeyihiin taayaro yar yar oo meel yar gali kara. Kaliya u isticmaal taayirka yar ee keyda si aad ugu sii wadato inta aad kan kaa banjaray meel sameys ku geyneysid. Badanaa xawaaraha baabuurka lama dhaafsiin karo 80km / saacaddii.



- Hubi in baalayaasha masaxa Muraayadaada ay xaaladooda fiican tahay oo biyaha muraayada lagu dhaqo aad ku shubtid. Si aragtida eey u sahlanaato, ka nadiifi muraayada gudaha iyo dibedda.



- Hubi heerka olyada iyo kuulant ka.



- Ku samee meelo ka fog baabuurta kale tijaabo fariinka ah. Haddii fariinka uu dhawaaqo ama shanqar ka yeerto, waxaa laga yaabaa ineey u baahan yihiin in laga shaqeeyo.

# Baabuurta four-wheel drive ka ah (4WD) kuma haboona in loo isticmaalo gaari caadi ah camal.



# ILAALI DADKA LUGAYNAYA

Dadka lugeynaya waa kuwa qatarta ku sugan ee isticmaala wadada, sidaa darteed taxaddar dheeri ah samee oo si xushmad leh ula wadaag waddooyinka.

**Darawalada baabuurta ama kuwa mootooyinka**

Marka aad tahay darawal baabuur ama mid mooto, waa inaad wadada siisaa dadka lugeynaya:

- markaad leexaneysid
- markaad kala wareeg ama dib u noqosho sameeyneysid
- markaad soo gaartid calaamada stop ka
- marka aad ku timaado wado bidix u baxdo oo xariijinta stop ka eh

Dadka lugeynaya ayagaa xaq kaaga leh wadada xariijimaha dameer faroow ga oo kale ah, oo wadada lagu calaamadeeyay xariijimaha cad, iyo isgoysyada nalalka taraafikada leh.

**Dadka lugaynaya**

Markaad ka goyneysid nalalka kontoroolka taraafikada, waxaad goyn kartaa kaliya marka calaamadaha qofka lugeynaya cagaaran yihiin. Ha goynin haddii nalku uusan kutusineyn calaamada qofka lugeynaya ama calaamada qofka lugeynaya ay tahay gaduud / casaan.

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**



# LA WADAAGIDA WADADA BUSHKULEETILEYDA

WA dhexdeeda, darawalku wuxuu dhaafi karaa qofka baaskiilka wata oo eey isku jiho u socdaan marka uu u jiro masaafo ammaan ah oo ah:


- 1 mitir waddooyinka loogu talagalay in baabuurka lagu wado xawaaraha xaddidan ee lagu dhejiyay jidka ahna 60 km / saacadii ama ka yar
- 1.5 mitir waddooyinka loogu talagalay in baabuurka lagu wado xawaaraha xaddidan ee lagu dhejiyay jidka ahna 60km / saacadii ama ka yar

Shuruucda masaafada nabdoon waxeey u oggolaaneysa darawalada inay ka gudbaan xariijinta dhexe ee kala qeybisa wadada, oo eey kujirto xariijinta aan kala go'neen xataa, laakiin in sidaas looga gudbo waxaa la sameyn karaa oo kaliya markeey nabdoon tahay, iyo marka darawalku uu si fiican u arki karo baabuurta soo socota.

Sharciyada masaafada ugu yar ee la ogol yahay marka la is dhaafayo ma khuseeyaan baaskiillayda dhaafaya baabuurta.

Waad ku dhex wadi kartaa baabuurka khadka loo calaameeyay baaskiilada illaa 50m si aad u dhigato meel gawaarida la dhigto oo loogu talagalay (eeg muuqaalka hoose).

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**






# LA WADAAGIDA WADADA GAWAARIDA WAAWEYN

Baabuurta culus, sida tareenada waddooyinka mara (eeg bogga 32), gawaarida waaweyn, basaska iyo mashiinada beeraha waxay ka miisaan culus yihiin gawaarida caadiga waxayna u baahan yihiin masaafo dheeraad ah oo eey istaagi karaan.

Ha ku jarin baabuurkaaga baabuur weyn hortiis meelaha nalalka taraafikada, calaamadaha la istaajiyo baabuurka hortooda ama meelaha baabuurtu ku badan tahay maxaa yeelay darawalka baabuurka weyn ayaa laga yaabaa inuusan haysan meel ku filan oo uu fariin ku qaban karo.

Darawalada gawaarida waaweyn iyo kuwa xamuulka ah waxay isticmaalaan muraayadaha geesaha baabuurka ku dhagan si ay ula socdaan waxa ku hareeraysan. Haddii aad istaagto meel uusan darawalka baabuurka weyn kaa arki Karin micnaheedu waxeey tahay ma muuqaneysid.

Haddii aadan arki karin muraayadaha darawalka ee geesaha uga dhagan gaariga weyn, darawalka gaariga xamuulka ah kuma arki karo.

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**



# WADISTA MOOTO

Mootooyinka ma siinayaan dadka isticmaala ilaalinta jirka sida gawaarida kale.

Waa khasab darawalada mootooyinka iyo rakaabka inay xidhaan koofiyadaha mootada ee waafaqsan heerarka Australia.

Carruurta ka yar sideed sano looma oggola inay u raacaan mooto rakaab ahaan.

La tasho websaydhka 'MotoCAP' si aad u hesho qiimeyn raaxo iyo amaanad leh oo loogu talagalay noocyada kala duwan ee ah surwaalada lagu wado ee jirka difaaca, jaakadaha iyo galoofyada. Websaydhka CRASH wuxuu leeyahay hage kaa caawinaya inaad iibsato koofiyad mooto oo sharciyada Australia waafaqsan.

**Websaydhka MotoCAP**
motocap.com.au

**Websaydhka CRASH**
crash.org.au

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**



# SIDA LOOGU DARSAMO LEYN KALE

Western Australia waxaa ka jira laba nooc oo wadooyinka isu dhexgalaan.

1. Meesha ay laba wado iskaga milmaan oo hal wado ay ku dhammaato, gaadhiga hore ayaa xaq u leh wadada.
2. Haddii ay jiraan laba wado oo calaamadeysan oo mid uu dhamaado, waxaa wadada siisaa baabuurka ku socday wadada aad rabtid inaad gashid.

Noqo mid wax qadariya meelaha wadooyinka iskaga milmaan, isticmaal fareejooyinkaaga, masaafo macquul ah ka fogoow baabuurka kale oo ku soco xawaaraha wadada aad ku biireyso haddii ay suurta gal tahay.

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**




**Halka ay laba wado ku midoobaan, gaariga kaa horeeya wuxuu xaq kaaga leeyahay wadada.**

# WADOOYINKA WAREEGA (ROUNDABOUTS)

Markaad galeyso wadada wareega ah, waa inaad wadada siisaa gawaarida horayba ugu jiray wadada wareega ah.

Wadooyinka wareega ah oo dhowrka leyn leh, u hogaansan fallaaraha jihada ee wadada.

**Bidix u leexasho**

- Marka aad soo dhowdahay, fareejada bidixda shido adoo ku jira leeynka bidix.
- Ku jir leeynka bidix oo ka bax wadada wareega adoo ku jira leeynkan.

**Markaad toos aadeysid**

- Uma baahnid inaad fareejo shidatid markaad soo dhowdahay.
- Gal leeynka bidix ama midig midkood, ku jir leynkaaga oo kaga bax isla leeynkaas.
- Hadday suurogal tahay, fareejada bidix daaro markaad dhaaftid bixitaanka bidix (exit) ee ugu dambeeya ka hor inta aan la gaarin kan aad damacsan tahay inaad ka baxdo.

**Midig u leexasho ama sameynta leexasho dhameystiran**

- Marka aad soo dhowdahay, fareejada bidixda shido adoo ku jira leeynka bidix.
- Ku jir leeynka bidix oo ka bax wadada wareega adoo ku jira leeynkan.
- Hadday suurogal tahay, fareejada bidix daaro markaad dhaaftid bixitaanka bidix (exit) ee ugu dambeeya ka hor inta aan la gaarin kan aad damacsan tahay inaad ka baxdo.

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**

# MARKAAD SAMEYNEYSID DIB U LAABASHO

Haddii aad sameyneyso dib u laabasho, waa inaad had iyo jeer fursad siisaa dhammaan baabuurta kale ee isticmaaleysa wadada oo aad fareejo shidataa.

Waxaa Khasab ah in aadan dib u laabasho ku sameeyn:


- meelaha nalalka taraafikada leh, haddii aysan jirin calaamad muujinaysa in kala wareegista la ogol yahay
- meelaha ay ku qoran tahay calaamada 'No U-turn'
- waddooyinka waaweyn ee freeway yada ah
- haddii aadan si fiican ugu jeedin baabuurta kusoo hor socota

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**

# XAWAARAHA BAABUURKA LAGU WADO

La soco xawaarahaaga. Had iyo jeer ku wad baabuurka adoo qadarinaya marxaladaha taagan markaas.

- Weligaa ha dhaafin xadka xawaaraha.
- 40km / saacadii xawaaraha ah ayaa meelaha qaar loo adeegsadaa, sida aagagga iskuulada iyo meelaha ay wadaagaan dadka lugeynaya iyo gawaarida. Meelahan ayaa lagu dhajiyay tabeelooyin tilmaamo ah.
- Haddii aysan jirin wax calaamado ah, xadka xawaaraha caadiga ah ee:
  - dhammaan magaalooyinka gudahooda waa 50km / saacaddii
  - waddooyinka waaweyn ee freewayga ah waa 100km / saacaddii
  - Wadooyinka ka baxsan magaalada ee furan waa 110km / saacaddii.
- Darawallada buubuurta baraneysa iyo darawallada baabuurta gurayaha ah jiidaya, doon ama tareele kuma safri karaan wax ka badan 100km / saacaddii, xitaa haddii xawaaraha wadada loo ogolyahay uu ka sareeyo intaas.
- Wadooyinka waaweyn ee freeway yada ah, waa inaadan ku safrin wax ka yar ama ka badan 21km / saacadii xadka xawaaraha loogu talagalay, inaad la kulanto adeegyada gurmadka degdega ah ama wadadoo ciriiri ah maahane.




**Meelaha iskuulada ee baabuurta marto oo dhan waxeey leeyihiin xawaare xadkiisu yahay 40km / saacadii inta lagu jiro saacadaha ardayda dugsiga imaanaayan iyo waqtiyada bixitaanka.**

## GAWAARIDA GURMADKA

Waa inaad u oggolaataa gawaarida gurmadka degdega ah, sida booliiska, dab damiska ama ambalaasta, oo ay u daaran yihiin laydhkooda buluugga ah ama casaanka ah ee birbirqaya iyo / ama dhawaaqa seeriga, inay si fudud kuu dhaafaan.

Marka gaari gurmadka degdeg ahi soo dhowyahay:

- Sii wadada adigoo u dhaqaaqaya dhanka bidix ee wadada intii aad awoodo.
- Haddii aadan awoodin inaad u dhaqaaqdo bidix, fareejo u shido bidix una oggolow gaariga gurmadka degdega ah inuu dhinac kuu dhaafo.
- Haddii aad heysatid leeynka bidix, u oggolow gawaarida kale ee dhanka Midigtaada ah ineey soo galaan leynkaaga, haddii loo baahdo.

**Ha jebin sharciga**

Sharciga SLOMO (Slow Down, Move Over) wuxuu ku farayaa ineey Khasab tahay inaad qaboojisid baabuurka ood xawaaraha ka dhigtid 40km / saacaddii markaad usoo dhowdahay gawaarida gurmadka degdegga ah oo meel taagan ama gawaarida shilalka usoo gurmada oo nalalkoodu biligleynaya meelaha shilalka ka dhaceen.

### Waa inaad u oggolaataa gawaarida gurmadka deg-dega ah ee uu nalalkooda buluug ama casaanka ah ifayaan inay si fudud kuu dhaafaan.



# WADISTA QOFKA OO CABSAN AMA DAROOGO ISTICMAALAY

**Baabuur wadista qofka markuu cabsan yahay**

Bilayska WA waxay si kadis ah uga baaraan darawalada inta qamriga dhiigooda kujiro. Ujeeddadu waa in laga caawiyo sidii loo hubin lahaa nabadgelyada qof kasta oo wadada ku jira. Waa sharci daro in la diido baaritaanadan

Waa sharci darro in lagu wado baabuurka cadadka khamriga dhiiga kujiro uu la egyahay ama ka sarreeyo .05%. Tani waxay u dhigmi kartaa wax yar oo khamri ah. Sharciga ah in eeysan qofka jirkiisu wax khamri ah haba yaraate kujirin waxeey quseysa:

- darawalada baabuur wadista baranaya iyo darawalada mootooyinka
- darawalada baabuur wadista baranaya iyo darawalada mootooyinka
- dadka haysta leysanada aan caadiga ahayn
- haddii dhowaan lagaa dhigay laysanka baabuur wadista
- haddii aad wado gaari culeyskiisu ka badan yahay 22.5 tan
- haddii aad wado bas, taksi ama gaari yar oo caasi ah.

Xadka sharciga ogol yahay ayaa sidoo kale khuseeya darawalka wax kormeeraya.

**Wadista baabuurka marka qofku daroogo qaatay**

Booliisku wuu ku joojin karaa haddii ay ka shakiyaan in awoodaadu ay wax u dhintay daroogo nuuc kasta.

Waxaa lagaa qaadi karaa baaritaan candhuuf ama dhiig ah. Waa sharci daro in la diido baaritaanadan

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**



# MASHQUULINTA TALEEFANKA GACANTA

Mashquulka darawaliinta ayaa ah sababta ugu weyn ee keenta dhibaatooyinka waddada. Shuruucda ku saabsan isticmaalka taleefanka gacanta ee sharci darrada ah si adag ayaa loo dhaqan galiyaa.

Haddii aad gaari wadid, waad taaban kartaa taleefanka gacanta si aad u qabatid ama damisid marka lagu soo Waco oo kaliya haddii taleefanka uu si fiican ugu dhagan yahay baabuurka. Haddii taleefankaagu uusan ku xirnayn wax celinaya, waxaa loo isticmaali karaa inaad qabato ama damisid marka lagu soo waco kaliya adoo adeegsanaya:

- hadalka codka (voice activation)
- Bluetooth ka oon kaaga baahneen inaad gacan ku taabatid taleefanka

Waa sharci darro in la qoro, la diro ama la fiiriyo fariin qoraal ah, fariin fiidiyoow ah, emayl ama isgaarsiin la mid ah intaas marka aad gaariga wadid, xitaa marka taleefanka la isticmaali karo adiga oo aan taaban.

Waad isticmaali kartaa GPS-ga taleefankaaga marka aad gaariga wadid, haddii laga shaqeeysiin karo adiga oo aan taabanin badhanka ama shaashadda. Waa in la daaraa intaadan safarkaaga bilaabin.

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**



# SUUMANKA WAXAY BADBAADIYAAN NOLOSHA

Suumanka baabuurta in la xirto waa qasab. Adiga darawalka ah iyo rakaabkaaga labadiinaba waa laydin ganaaxi karaa hadii aadnaan xiran suumanka baabuurta.

Adiga darawalka ah, waxeey masuuliyad kaa saaran tahay hubinta in rakaabku u xirteen suumanka baabuurta sida loogu talo galay. Xisaabta ku darso dhererka iyo culeyska carruurta markaad dooranaysid sida loo xakamaynayo.

**Xakameynta ilmaha iyo qaabaynta fadhiga**

Sharcigu wuxuu dhigayaa in carruurta da'doodu tahay:

- inta ka yar lix bilood waa in lagu xiraa kursi gadaal ujeeda (tusaale ahaan kuraasta dhallaanka)
- lix bilood ilaa afar sano inta u dhaxeysa waxaa lagu xiraa kursi usii jeeda gadaal ama horay oo eey barkin gudaha uga dhagan tahay.
- laga bilaabo afar jir ilaa toddobo jir waxaa lagu xiraa kursi horay usii jeeda ama kursi ah fadhi kor usoo qaadaya oo leh meel suunka si ku habboon loogu dhuujin karo.

**Carruurta ka weyn toddoba sano**

Carruurta da'doodu ka weyn tahay toddoba sano waxaa lagu xirayaa kursiga fadhiga kaliya ah eek or usoo qaada caruurta ama suunka dadka waaweyn haddii ilmuhu weyn yahay.

**Halkee ayuu fadhiisan karaa cunugeygu**

Haddii gaariga uu leeyahay laba saf oo kuraas ah ama ka badan, carruurta da'doodu ka yar tahay toddobo sano waa inaysan fariisan safka hore.

Carruurta da'doodu u dhexeyso afar illaa toddobo sano ayaa ku safri kara kursiga hore haddii dhammaan kuraasta dambe ay fadhiyaan rakaab da'doodu ka yar tahay toddobo.

Carruurta toddobo sano jirta ama ka weyn way fariisan karaan kursigeey doonaan, haddii I fiican suunka loogu xiro.

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir Khadka Macluumaadka Suun-u-xirista Carruurta ee ah 1300 780 713.

**Ka waran tagaasida iyo baabuurta laysla wadaago sida Uber ka oo kale?**

Xitaa haddii ilmaha yar kursiga hore si fiican loogu xiri karo, carruurta ka yar 7 sano waa in aan la fariisinin safka hore ee taksiga.


**Baabuurta laysla wadaago sida Uber ka oo kale**

Darawalada baabuurta laysla wadaago sida Uber ka waa inay hubiyaan in rakaabku xiran yahay suunka.

In kasta oo aad loogu talinayo, ma jiro wax shuruud ah oo laga rabo darawalka inuu hubiyo isticmaalka kuraasta carruurta. Haddii aan la heli karin kuraasta carruurta, carruurta da'doodu u dhexeyso hal ilaa toddobo sano waa in lagu xiraa suunka dadka waaweyn.

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**





# SI NABDOON IN BAABUUR LOOGU WADO TUULOOYINKA IYO MEELAHA FOG FOG

## U ISTAAGIDA SAWIRRADA

Ha istaagin wadada si aad u daawato ama sawir uga qaaddo muuqaalka.

**Si aad dhinac ammaan ah uga baxdo wadada:**

- inta aadan wadada ka bixin ka hor fareejo sii daaro si loo hubiyo in baabuurta kal u hellaan ogeysiin badan oo ah waxa aad damacsan tahay
- si taxaddar leh u wad baabuurka, gaar ahaan haddii garabka waddadu ay tahay wasakh ama jaay, oo dhig baabuurka meel aad uga fog waddada.

**Markaad wadada dib ugu soo laabaneysid:**

- ogsoonoow in gawaarida ay ku socon karaan xawaare sare
- sug faraq aad u weyn oo u dhaxeeya baabuurta socota
- sii waqti kugu filan si aad dib ugu gasho wadada adigoon carqaladeynin socodka baabuurta kale ee wadada kujirta una kordhin xawaaraha eey ku socdaan baabuurta wadada.

## U wad baabuurka si tartiib ah oo taxaddar leh

(walibahaddiiwadadagarabkeedaaytahaywasakhamajaay).

# DAAL FARA BADAN SAFAR DHEER DABADEED

WA waa 2.5 milyan oo kiilomitir laba jibbaaran ah. Masaafada u dhexeysa magaalooyinka waxaa laga yaabaa inay aad uga fogtahay sidaad u malaynayso.

- Isticmaal khariidad waddo oo faahfaahsan, dhawaanahana ah.
- Sii qorshee safarkaaga adigoo ku saleynaya masaafooyinka aad damacsan tahay inaad safarto, adoo tixgelinaya xaaladaha waddooyinka iyo cimilada.
- La soco masaafada aad soo martay.
- Cab biyo si aad uga hortagto daalka.
- Qaado ugu yaraan afar illaa shan litir oo biyo ah qofkiiba, maalintii..
- Qaado shidaal dheeri ah.
- Naso habeen ka hor safarkaaga dheer.
- Gaari ha wadin haddii aad daal dareento.
- Qaado nasashooyin joogto ah. Istaag marar badan si aad u nasato - oo aad ugu raaxeysato muuqaalada.
- Shidaal qaado mar kasta oo aad aragto kaalin shidaal.
- Hakula wadaago wadista baabuurka qaraabo ama saaxiib.
- Markii aad hesho nasiino fiican kaliya baabuur wadista ku laabo.



## Ma ogtahay?

Waxay noqon kartaa masaafo ilaa 200km ah inta udhaxeysa xarumaha shidaalka. Shidaal qaado mar kasta oo aad aragto kaalin shidaal. Qaado shidaal dheeri ah haddii aad qorsheyneyso inaad safarto masaafo dheer.



# KU WADISTA WADDOOYINKA JAAYGA AH

Wadooyin badan oo tuulooyinka WA ah waxeey ka sameeysan yihiin dhagaxyo yaryar oo loo yaqaan jaay. Mararka qaarkood, jaay ga ayaa sidoo kale laga heli karaa hareeraha waddooyinka iyo geesaha.

Jaayga waa sida kubbad lagu dhejiyay taayirrada baabuurta hoostooda waxayna u horseedi karaan gaariga inuu siibto xakameyn la'aan.

- Qabooji baabuurka meelaha jiirooyinka ah.
- Si degdeg ah ha u qaban fariinka si uusan baabuurka kuula goosan, ama kuula siiban ama aadan u lumin koontaroolka gaariga.
- La soco in jaay ga iyo waddooyinka wasakhda ahi ay waliba abuuraan daruuro waaweyn oo siigo ah. Tani waxay caqabad ku tahay aragtida. Xaaladahan oo kale, masaafa aamin ah ka dambeey gawaarida kale.

Waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad u diyaar garowdo boodhka iyo dhagxaanta ay tuurayaan baabuurta u socota dhinaca kaa soo horjeeda. Nalalka hore shido marka aad baabuurka ku wadid dhammaan jidadka wasakhda leh.

## Qabooji baabuurka meelaha jiirooyinka ah. Fariin si degdeg ah ha u qaban.



## DHAAFITAANKA WADDADA TAREENADA

Waxaa loo yaqaan 'tareenada wadada', qaar ka mid ah gawaarida ugu waaweyn ee adduunka waxaa laga heli karaa Western Australia. Qaarkood way ka dheer yihiin 50m waxayna u baahan yihiin taxaddar badan markaad dhaafeysid.

- Waxaad u baahan tahay waddo dheer oo fidsan oo toosan taas oo si cad aad arki karto.
- La soco in ay qaadaneyso waqti inta aad ka dhaafeyso mid ka mid ah gawaaridan dhaadheer.
- La soco in marka aad dhaafeysid, dhaqdhaqaaqa hawada ee ay soo saaraan gawaaridan waaweyn ayaa sameeyn kara dabeeyl sababi karta in gaarigaaga u jiidmo dhanka gaariga weyn.
- Qaado waqtigaaga. Dib u jirso baabuurka kale ilaa inta u dhaxeyn karta dhowr baabuur. Markay habboon tahay in la dhaafo, fareejeey oo si nabad ah ku dhaaf. Weligaa ha dhaafin xadka xawaaraha.
- Haddii aad jiidayso baabuurta guryaha camal ah ama tareele, ha isku dayin inaad dhaafto tareenada wadada. Sug intaad ka heleyso leeynka lagu dhaafo baabuurta, haddii ay habboon tahay in la dhaafo.
- Wadooyinka tuulooyinka ee mashquulka badan, waxeey leeyihiin leeymanka laisku dhaafi oo qiyaastii 5 ilaa 20km kasta ku yaal. Haddii aad ku safreysid 100km / saacaddii, tani waxay ka dhigan tahay inay isu jiraan 3 illaa 12 daqiiqo. Ha dhaafin haddii aysan amaan ahayn.



## Ma ogtahay?

Tareennada waddooyinka dhererkoodu waa 53.5m (175.5 fuudh) oo leh laba, saddex ama afar isjiidka ah. Markaad ku dhaafeysid xawaaraha 110km / saacaddii waxay qaadan kartaa 2.5km ama qiyaastii 85 ilbidhiqsi.



# XAYAWAANKA DUURJOOGTA AH EE WADADA SOO GALA

La soco in xayawaan meelaha iskawareegayan sida kangaroos, lo'da, geela iyo xitaa shimbiraha waaweyn ay dagi karaan ama ka gudbi karaan wadada gaarigaaga hortiisa.

Xayawaanada wadada maraya waxay noqon karaan kuwa aan la saadaalin karin. Mararka qaarkood, waxay u jiheystaan dhinaca gaarigaaga halkii ay ka fogaan lahaayeen.

- Tartiib u soco. Lahoow fursad aad fariin ku qaban kartid.
- Hoonka yeeri. Haddii aad si amman ah u sameyn kartid, si tartiib ah u dhinac mar.
- Ha isku dayin inaad xawaare xoog ah adoo ku socda dhinac martid xayawaan. Taas waxeey sababi kartaa inaad ku dhacdo baabuurta kale ama aad kala dhacdo wadada jaay ga ah kharkeeda.

In ka badan 7,000 oo shil oo kangaroos ah ayaa ka dhaca Australia sannad kasta. Waxay geysan karaan waxyeello weyn marka gaariga uu xawaare ku socdo. Qiyaastii 15% baabuurta ku lug leh ayaa noqda kuwa laiska tuuro Khatartu waxay sii badan tahay markay qorax dhac ama qorax soobax tahay. Kangaroos ka waxay si gaar ah u badan yihiin xilliga qaboobaha.

Inta aad gaariga wadid, fiiri hortaada ilaa inta indhahaaga arki karaan – iskana fiiri labada dhinac ee wadada si aad u ogaato dhaqdhaqaaqa xayawaanka.



**Maxaa lagaa rabaa inaad sameyso haddii aad ku dhacdo xayawaan?**

Haddii xayawaan goobtaas ku nool uu dhaawacmay:

- Xaqiiji inaad gaarigaaga si nabadgelyo leh uga saarto wadada.
- Wac khadka caawinta daryeelka duurjoogta 9474 9055.
- Ha u dhowaanin kangaroo dhaawac ah. Kangaroos ka waxay leeyihiin laad aad u xoog badan waxayna sababi karaan waxyeelo aad u badan haddii lagugu dhufto.



# MARKA AAN SI FIICAN WAXBA LOOGU JEEDIN

Qorshee safarkaaga si aad uga fogaato waddooyinka ay saameeyeen qiiqa dabka ama daadka. Wixii digniino ah, ka hubi:

**Gurmadka degdega ah WA**
emergency.wa.gov.au

**'Khariidada safarka' ee Main Roads**
mainroads.wa.gov.au

Ka fogow wadista baabuurka marka qiiq ka jiro aagga. Haddii aadan awoodin, tartiib ugu wad gaariga adoo qadarinaya marxaladaas.

Ka fogow wadista baabuurta iyo mootooyinka haddii qorraxdu toos u qabaneyso indhahaaga. Waxaa la doorbidaa in la qaato nasasho illaa qorraxdu kasoo baxdo samada. Fiidkii, sug inta qorraxdu ka dhaceyso. Ka bacdi kuwad baabuurka ilaa inta nalalkaaga hore eey ku tusi karaan.

Ka digtoonow duurjoogta wadada.

Waxaa lagugula talinayaa inta lagu jiro maalinta inaad baabuurka ama mootada wadid iyadoo laydhku kuu shidan yahay. Tani waxay kaaga dhigi doontaa, adiga iyo jihada aad u socoto, ineey ku arkaan dadka kale ee isticmaalaya wadada.



# NALALKA IFTIINKA BADAN

Inta badan waddooyinka tuulooyinka iyo kuwa meelaha fog fog waxaa aad u yar ama eeysan lahayn nalalka waddooyinka. Iyadoo taas la raacayo, waxaa laguu oggol yahay inaad u isticmaasho iftiin sare nalalkaaga hore si aad u aragto meesha aad baabuurka ku wadato.

Haddii aad usoo dhawaatid, nalka iftiinka badan ayaa jahwareer ku ridi kara darawalada kale. Tani waxay sababi kartaa shilal.

Saamiga sare (full) ee nalalka hore lama oggola haddii:

- hadii aad wax ka yar 200m daba socotid baabuur gadaashiisa
- gaari soo socda ayaa kuusoo jira 200m - ama nalkiisa hore ayaa caadi ah (yacni full nal uma shidno).

Nalalka ceeryaamada waxaa loo isticmaali karaa xaaladaha ceeryaamada, duufaanka boodhka ama roobka culus. Ha wadin baabuur ka nalka hore iyo nalka ceeryaamada oo kuu wada daaran.

**Ganaax ayaa ka dhalan kara wixii sharci jabin ah.**






# WADOOYINKA CALAAMA-DAHOODA


City Centre

# CALAAMADAHA WADDOOYINKA QAARKOOD EE WESTERN AUSTRALIA




WA meelaha wadooyinka tareenka laga gooyo inta badan waxay iska gooyaan jidadka.

- Joogso marka aragtid calaamadaha digniinta.
- Sug inta tareenku socdo, ama tareenadu ay dhaafayaan.




Calaamadaha birqaya ee sheega baabuurta xawaaraha sare ku socda ayaa badanaa laga helaa meelaha u dhow dugsiyada.

- Hoos u dhig xawaaraha 40km / saacaddii.
- Iska ilaali carruurta.



Wadooyinka wareega ah waa lagu jahwareeri karaa.

- Had iyo jeer ku wad baabuurka dhinaca bidix dhanka saacad u jeedo jihada. Eeg bogga 19.




Wadooyinka fog fog qaarkood waxay leeyihiin calaamado laga tagay oo hore oo la xiriira xawaaraha la ogol yahay.

- Meelahan, xadka xawaaraha ugu badan waa xawaaraha caadiga ee Gobolka (hadda 110km / saacaddii).
- Had iyo jeer ku wad baabuurka adoo qadarinaya marxaladaha taagan markaas.

# TILMAAMAHA CALAAMADAHA BAARKINADA

Waxaa la soo jeedinayaa in qofka rakaabka ah uu isticmaalo aaladda casriga ah ee taleefanada casriga ah lagu soo dejisan karo (app) ee tarjumi karta calaamadaha baarkinka.




### Ma joojin kartid baabuurka

Baabuurta looma ogola inay istaagaan inay xaaladaha baabuurta kalifto maahane. Aaggaga aan la istaagi Karin ayaa sidoo kale waxaa lagu aqoonsan karaa xariiq adag oo jaalle ah oo ku taal wadada dusheeda, kuna barbar socota, qarka wadada.




### Lama dhigan karo

Waqtiga ugu badan ee la dhigan karo meel aad qof ama alaab ku dajineysid ama ka qaadeysid waa laba daqiiqo. Darawal ahaan, waa inaad u jirsataa seddex mitir gaariga kale.




### Baarkinka tigidh ka loo goosto

Tigidh waa in laga iibsadaa mashiinka tigidhada baarkinka oo la dul saara daashboorka (dashboard). Tigidhku wuxuu ku shaqaynayaa oo keliya aaggii laga iibsaday. Hubso inaad u hoggaansamayso wixii tilmaamo ah ee ku saabsan calaamadda, tigidhada ama mashiinka tigidhada. (tusaale ahaan waqtiga xaddidan 1P = 1 saac ugu badnaan).




### Baarkinka Waqtigiisu Xaddidan Yahay

Saacada kala duwan ee baarkinka la dhigan karo ayaa laga yaabaa in lagu muujiyo hal calaamad. Tusaale ahaan, waxay soo bandhigi kartaa ‘2P laga bilaabo 8 subaxnimo - 5:30 galabnimo. ’ Wixii ka dambeeya saacadahaas, muddada baarkinka waa mid aan xad lahayn.

## AAGAGGA DHOWRKA NUUC LOO ISTICMAALO

Calaamado fara badan ayaa tilmaamaya xannibaadaha waqtiyo kala duwan ee khuseeya maalintii ama habeenkii. Qayb kasta oo ka mid ah calaamadda waa in loo akhriyaa iyadoo lala kaashanayo kuwa kale. Saacadaha loogu talagalay ee khuseeya ujeeddo kasta ayaa lagu soo bandhigi doonaa calaamadaha.

**Wadada Baska**

Waa inaadan ku wadan ama aadan dhigan laamiyada basaska inta lagu jiro saacadaha lagu tilmaamay calaamadaha ama calaamadaha wadada.

**Waddada oo la banneeyo**

Calaamadaha waddada in la baneeyo ah waxay muujinayaan waqtiyada baabuurta badan yihiin ee aadan joojin karin ama dhigan karin gaarigaaga jidka bannaan.

**Jiidida**

Haddii aad u dhigatay si sharci-darro ah aag loo calaamadeeyay ‘lama istaagi karo, Waddo Banaan ama laynka baska,’ baabuurkaaga waa lagaa jiidan karaa. Hadday taasi dhacdo, kala xiriir Main Roads WA taleefanka 138 138. Waxaad sameyn kartaa inaad gaariga soo qaadatid saacadaha cayiman oo eey furan yihiin kaliya. Waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso ganaax lacageed si gaariga laguugu sii daayo.



# MACLUUMAAD IYO ILO WAXTAR LEH

Ku soo dejiso barnaamijka 'Ambalaaska' St John's 'First Responder' taleefankaaga. Haddii aad u baahato inaad wacdo 000 si aad u hesho ambalaas, barnaamijku wuxuu si otomaatig ah ugu dirayaa isku-duwahaaga GPS hawlwadeenka. Tani waxay dedejineysaa waqtiga ay qaadaneyso si loo xaqiijiyo goobtaada loona soo diro ambalaas.

Abka sidoo kale wuxuu ka kooban yahay ilo kale. Waxaa ka mid ah hagayaasha tilmaamaha gargaarka degdegga ah iyo meelaha ay ku yaalliin xarumaha caafimaadka ee ugu dhow iyo waaxda gurmadka degdega ah ee isbitaalka.

Ku soo dejiso barnaamijka 'Ambalaaska' St John's 'First Responder' taleefankaaga.

**Ambalaaska St John's 'First Responder' App-kooda**
www.stjohnwa.com.au/online-resources/st-john-first-responder-app

Waxaa sidoo kale lagugula talinayaa inaad horay usii qaadatid waxyaalaha qiimaha leh marka aad dhiganeyso oo aad uga tageyso gaarigaaga goobaha dalxiisayaasha u badan yihiin (halkaasoo oo tuugada wax bartilmaameedsato). Wax kasta oo ka muuqda gudaha gaariga waxay kordhin karaan fursadaha jabsiga.

GOVERNMENT OF
WESTERN AUSTRALIA

ROAD
SAFETY
COMMISSION

www.rsc.wa.gov.au